

**Medical Services** (Adeegyada Caafimaadka): waa u lacag la'aan dadka haysta Kaarka Medicare.

**Dental Services** (Adeegyada Daawaynta Ilkaha): oo loogu talagalay dadka haysta kaararka Ka-Dhaafka ee healthcare ama howlgabyada waa \$22.00 halkii fisidba, ama ugu badnaan \$88.00 ee halkii koorso ee daawaynta guud ah. Ballamaha aan la imaan waxaa laga qaadaa \$10. Wixii degdeg ah qofna lagama diidayo in la daaweeyo sabab lacag la'aaneed awgeed.

**Wax ujrado ah lagama qaado Kala-talinta Daroogada & Khamriga, Kala-talinta Khamaarka iyo Kala-talinta Maaliyadeed.**

Adeegyada kale oo dhan waxaa looga baahan yahay in laga qaado \$7.50 halkii fisidba ee dadka haysta kaararka healthcare concession-ka iyo \$12.00 ee dadka aan haysan kaararka.

Adeegyadu waa u lacag la'aan carruurta ka yar da'da 18 sano kuwaas oo haysta kaararka healthcare concession-ka.

Ujrad ayaa laga qaadaa kulannada kooxaha qaarkod.

Haddii aad wax ka qabto xaddiga ujadaha aad bixinayso, fadlan kala hadal bixiyahaaga adeegga (service provider).

UJRADUHU (FEES) WAY IS-BADDALI KARAAN

## KU-IMAANSHAHA BALLAMAHA


Wixii joojin ama burin ah, waxaa loo baahan yahay ogaysiin 24 saac ka hor ah. Waxaan kaa filaynaa inaad ilaaliso waqtiga ballamahaaga. Haddii aad ka soo daahdo ballamahaaga, waxaa suurtagal ah inaan lagu qaabilin.

3/25-33 Grimshaw Street, Greensborough  
Taleefanka: 9433 5111 Fakiska: 9435 8922  
Email: banyule@bchs.org.au  
Saacadaha: Isniinta ilaa Khamiista 8.30am – 6.00pm  
Jumcaha 8.30 – 5.00pm



## WEST HEIDELBERG

21 Alamein Road, West Heidelberg  
Taleefanka: 9450 2000 Fakiska: 9459 5808  
Email: banyule@bchs.org.au  
Saacadaha: Isniinta ilaa Khamiista 8.00am – 6.00pm  
Jumcaha 8.00am – 5.00pm



**BANYULE**  
Community Health  
CAAFIMAADKA BULSHA EE  
BANYULE

WADAJIR U SHAQAYN  
HUWAN KALSOONI IYO  
IXTIRAAM

Waa  
adeegaaga  
caafimaadka

## UJEEDDADA

Adeegga Caafimaadka Bulshada ee Banyule (Banyule Community Health Service Incorporated) ujeeddadeedu waxay tahay inay:

- ❖ Bixiso isku dhafka caafimaadka asaasiga ah iyo sahayda daryeelka iyo adeegga si loo haqabtiro baahida bulshada oo ku aaddan ka-hortagga iyo ilaalinta jirrada, dhaawaca iyo cudurka iyo yaraynta faqriga iyo jirrada.
- ❖ Horumariso habka dhinacyada badan ee wax looga qabanayo caafimaadka bulshada ayadoo lagu qabanayo shaqo ku salaysan koox iyo iskaashiga lala yeesho bixiyeyaasha kale ee caafimaadka iyo daryeelka.
- ❖ Hubiso in dadka u baahan helitaanka adeegyada caafimaadka iyo daryeelka in lagu siiyey kharash la'aan iyo carqalad la'aan.
- ❖ Wax ka qabato arrimaha caafimaadka ayadoo adeegsanaysa tabaha kor-u-qaadidda caafimaadka si loo horumariyo awoodda shakhsiyada, qoysaska iyo bulshooyinka, si kor loogu qaado, loo hagaajiyo loona ilaaliyo caafimaadka iyo ladnaanta.
- ❖ Ku dhiirigeliso oo xoojiso xubnaha degaanka bulshada inay ka qaybgalaan qorshaynta, maamulka iyo bixinta adeegyada caafimaadka iyo daryeelka.
- ❖ Wax ka qabato baahida shakhsiyada iyo bulshada ayadoo raacaysa cilmi-baaris, qorshayn iyo qiimayn joogto ah.
- ❖ Masuul u noqoto bulshada iyo haya'dihii maalgeliyey.

## TURJUMAANNADA

Adeegga turjumaanka waa la heli karaa haddii la codsado, waxaana fiican in ballan loo samaysto turjumaanka waqtiga ballanta ka hor. Wax urooyin ah lagama qaado adeeggan.

## ADEEGYADA LA QABTO

- ❖ Bukaank-socod-eegtada iyo Kalkaaliyeyaasha Caafimaadka Bulshada
- ❖ La-talin iyo Horumarinta Bulshada
- ❖ Dhakhtarka Ilkaha – Dadka Waaweyn iyo Carruurta
- ❖ Dhakhtarka Cuntada
- ❖ Kala-talinta Daroogooyinka iyo Khamriga
- ❖ Ka-hortagga Hore ee Cudurrada Karoonigga ah
- ❖ Caawinta Degdegga ah
- ❖ Bukaank-socod-eegtada Qorshaynta Qoyska
- ❖ FARREP ( Barnaamijka Qoyska iyo Waxbarashada Xuquuqda Is-dhallidda)
- ❖ La-talinta Maaliyadeed
- ❖ Khamaarka Gamblers Health Northern
- ❖ HARP (Barnaamijka Khatarta Gelitaanka Isabitaalka)
- ❖ Barnaamijyada Horumarinta Caafimaadka iyo Waxbarashada
- ❖ Daawaynta dhakhtarka qaata medicare-ka
- ❖ Barnaamijka Cirbadaha iyo Silingaha
- ❖ Teerabiga Caafimaadka Goobta (Carruurta & Waayeealkaba) (Occupational Therapy)
- ❖ Adeegyada Farmashiga
- ❖ Fiisootarabiga
- ❖ Baarista Cagaha Hoose
- ❖ Cilmi-nafsiga
- ❖ Daawaynta Hadalka (Carruurta)

## ADEEGYADA KALE

Adeeggu wuxuu kaloo bixiyaa hooy la siiyo wakaaladaha dibadeed oo aan hoos imaan Guddiga Maaraynta Adeegga Caafimaadka Bulshada ee Banyule (Banyule Community Health Service Committee of Management) waxaana ka mid ah:

- ❖ Banyule Nullimbuk Primary Care Alliance
- ❖ Isku xirka Bulshada (Community Link)
- ❖ Ururka Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha ee Heidelberg (Heidelberg Public Tenants Association)
- ❖ Adeegyada Dadka Soo-galootiga ah (Migrant Resource centre)
- ❖ Adeegyada Guryaha ee ee Waqooyi Bari (North East Housing Services)
- ❖ Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Olympic (Olympic Adult Education)
- ❖ RAFT (Adeegyada Kal-talinta Daroogada & Khamriga)
- ❖ Adeegyada Sharciga ee West Heidelberg (West Heidelberg Community Legal Services)
- ❖ West Heidelberg Neighbourhood Renewal

## KOOXAHA

Adeegga Caafimaadka Bulshada ee Banyule wuxuu ka shaqeeyaa ama taageeraa kooxo kala duwan oo ka socda Xarunta ama qaybaha kale ee bulshada waxaana ka mid ah:

- ❖ Banyule Carers Support Group
- ❖ Kooxda Caawisa Dadka Qaba Cudurka Sonkorowga ee Banyule (Banyule Diabetes Support Group)
- ❖ Bingo Group
- ❖ Kooxda Caawisa Dadka Qaba Cudurka Kansarka Naasaha (Breast Cancer Support Group)
- ❖ Casharrada Waxbarashada Sonkorowga (Diabetes Education Classes) (oo Fiidkii ah)
- ❖ Kooxda Caawisa Dadka Khamaara (Gamblers Help Group)
- ❖ Health Shopping Tours (oo Dhakhtarrada Cuntada la socdaan)
- ❖ Huf and Puf Support Group
- ❖ Jimicsiga Biyaha Dhexdooda (Hydrotherapy)
- ❖ Lets Do It Group
- ❖ Low Tolerance Exercise Group
- ❖ Kooxda Taageerta Caadifadda (MOOD Support Group)
- ❖ Kooxda Caawisa Daryeelka Caafimaadka Hooyooyinka (Mums Wellbeing Group)
- ❖ Barnaamijka Dib-u-noolaynta Wadane Xaniunka Kadib (Post Pulmonary Rehabilitation Program)
- ❖ Kooxda Tababarka Xoogaysiga (Strength Training Group)
- ❖ Kooxda Caawisa Isku Imaanshaha Ragga Soomaalida ah
- ❖ Kooxda Socodka (Walking Groups)

Wixii wax weydiimo ah ee ku saabsan barnaamijyadeena, kuwaas oo badanaa isbadbadala sida hadba ku habboon baahida iyo talo-soo-jeedinta bulshada.